

**Sharciga 24 Maajo 1961, lamba. 18**

**Garsooridda Maxkamadda Sare dacwadaha la xariira durista xukunada Maxkamadda Sare ee Gobollada Waqooyi.**

**MADAXWEYNAHA KU-MEELGAARKA JAMHUURIYADDA**

Marka uu arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer-dejinta Qaranka;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Xeerka soo socda:

**Qod. 1**

**Cabashooyinka loo soo Qaato Maxkamadda Sare**

Iqtisaaska in ay qaadaan cabashooyinka laga keeno xukunada iyo go'aamada Maxkamadda Sare ee Gobollada Waqooyi, ee ka horreeyay soo saarista Somaliland Order Council, 1960, oo ay u xilsaarnayda Easter African Court of Appeal waxaa loo soo wareejiyay Maxkamadda Sare.

Maxkamadda Sare marka ay ka garnaqayso cabashooyinka lagu soo sheegay faqradda sare, ugu yaraan xubin ka mida waa in uu ahaada garsoore khabiir ku ah sharciga Gobollada Waqooyi.

**Qod. 2**

**Habraaca la Dabbaqi Karo**

Inta laga soo saarayo xeer cusub; Maxkamadda Sare marka ay adeegsanayso garsooridda uu siinayo qod. Koobaad, waxay dabbaqaysaa wixii aan ka horimaanayn Dastuurka, xeerka habka dalka ka jiray ee 25 Juun 1960 oo hadda ah Gobollada Waqooyi.

**Qod. 3**

**Xeerka kala Guurka**

Muddooyinka lagu duri karay xukunada iyo go'aanada Maxkamadda Sare (Alta Corte) ee aan dhicin taariikhda 25 Juun 1960 waxay ka bilabanayaan taariikhda u dhaqangalo Xeerkaan.

Sikastaba cabooshinka laga keenay xukunada ama go'aanada kale Maxkamadda Sare (Alta) waxay soo galayaan iqtisaaska Maxkamadda Sare (Corte Suprema).

**Qod. 4**

**Xeerka Fulinta**

Wasiirka Cafiska iyo Garsoorka ayaa u fasaxan in uu soo saaro xeer lagu nidaaminayo iyo la iskuduwayo fulinta xerkaan marka loo baahdo.

**Qod. 5**

**Gelitaanka ayaa Dhaqan Galay**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta kuxigta marka lagu baahiyo Faafinta Rasmiga Jamhuuroydda.

Xeerkan waxa lagu darayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana kagu baahinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo la soo gudboonaada wuxuu ku waajibinayaa in ay u hoggaansato iyo in loo hoggaansamo isago ah xeer Jamhuuriyadda.

Taariikhda, Moqdisho, 24 Maajo 1961.

**Aadan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka koobaad

**A. H. Boni**

Wasiirka Cafiska iyo Garsoorka

**MAXAMUUD AXMED MAXAMED**